**Sharci lamba. 23 ee 11 Disember 1967**

**Sharciga khuseeya "ka reebinta si ku meel gaar ah canshuuraha dhoofista, midda maamulka iyo qorshaha ee mooska oo la marsiiyo qadka afrika"**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii uu helay oggolanshaha Golaha Qaranka;

**WAXAA LA SOO SAARAY**

Sharciga halkan ku qoran:

**Qod. 1**

Laga bilaabo 25 Juun 1967 ilaa iyo intii laga furi doono Suweez Kanaal, mooska laga dhoofiyo Somaliya waxaa la marsiiya aaga qadka Afrika waxaan laga reebay:

a) — canshuurta dhoofinta sida ku cad qeybta 12 ee Canshuurada furdaha oo lagu yareeyey ilaa Sh. So. 2 kintaalkiiba sida ku qoran Dekretada lamb. 6 ee 28 Disember 1965;

b) — Canshuurta maamuka iyo qorshada ilaa iyo qiiyaasti 5% qiimaha ku qoran Dekreetada sharciga ee lamb 9 ee 29 Disember 1966.

**Qod. 2**

Dekreetadaani waxay lagu keydin doonaa Keydka Rasmiga ee Shuruucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda.

Waxaa la faraya cid kasta ay u hoggansanato sharcigaan uuna hoggamiso cid kasto.

Muqdisho, 11 Disember 1967

**Abdirashiid Ali Shermarke**

Rai'sul Wasaaraha
**Mohamed Hai Ibrahim Egal**

Wasiirka Maaliyadda
**Haji Farah Ali Omar**